

BARNAAMIJKA XAKAMAYNTA AMA KONTORROOLKA QAAXADA

Akhbaarta Waalidiinta:

KA DIFAACIDDA ILMAHAAGA QAAXADA

1 Qaaxo maxay tahay?

Qaaxadu (TB) waa cudur halis ah oo badanaaba abbaara sambabada mararka qaarkoodna xubno kale oo jidhka kamida saameeya. waxa ku fidiya dadka caafimaadka qaba jeermis qufac ahaan uga yimaada sambabada qofka cudurka qaba.

2 Sideebaan ilmahayga uga daaficikaraa?

Tallaalka BCG waa cirbad yar oo lagu durayo haragga hoostiisa ee gacanta bidix xaggeeda sare aad ayeyna ugu wanaagsantahay caruurta kadifaaca noocyada halista ah ee qaaxada (TB).

3 Ayey tahay inuu qaato BCG?

Tiro yar oo caruur ah ayaa buuxinkarta shuruudaha tallaalkan. Si isdaba joogana **looma** siinkaro caruur oodhan.

Wagtiga dhalashada tallaalka BCG waxa la siiyaa dhallaanka khatarta dheeraadka ah u ah qaaxada kuwaasoo lagu qeexo:

- Inuu ku noolyahay guri ama qoys uu ku jiro qof Qaaxo hadda qaba ama hore Qaaxo ugu soo dhacday.
- In mid ama labadiisa waalid yihiin dadka pacifigga.
- In waalidka ama dadka guriga deggani yihiin kuwo shantii sannadood ee lasoo dhaafay lix bilood oo kamida ama kabadan kunoolaa** waddamo heerka dillaaca Qaaxadu aad u sarreeyo.
- In shanta sannadood ee ugu horreysa saddex bilood ama ka badan ay ku noolaan doonaan waddan heerka dillaaca Qaaxadu aad u sarreeyo.*

*Dhammaan wadamada aan ka ahayn Australia, Austria, Belgium, Canada, Czech Republic, Denmark, Finland, France, Germany, Greece, Holland, Iceland, Ireland, Israel, Italy, Luxembourg, Malta, Monaco, New Zealand, Norway, Slovakia, Sweden, Switzerland, UK and USA.

** Tilmaantani ma aha mid sugan. Tallaalkan waxa markasta lagu waaninayaa haday dadka waaweeni kudhasheen wadamo kale ayna ugu yaraan lix bilood shantii sano ee lasoo dhaafay ku qaateen wadan Qaaxadu ku badan tahay.

4 Waqtigee ugu wanaagsan ee ilmaha ugu qaadan karaa tallaalka BCG?

Waqtiga ugu wanaagsan ee ilmaha ugu qaadan karo BCG waa dhawr casho markuu dhasho kadib. Taa waxa la diyaarin karaa inta aad isbitaalka kujirto bukaan socod eegtada dadweynahana (clinic) waad ka qaadan kartaa. La hadal umulisadaada ama dhakhtarkaaga. Waxa lagu weydiin doonaa inaad saxeexo warqad ogolaansho.

5 Tallaalka BCG lacag mayahay?

Tallaalka BCG macaamiisha xaqa u leh waa lacag la'aan.

6 Maxaa caadi ahaan dhaca tallaalka BCG ka dib?

- Casaan yar oo xanuunleh ayaa ka muuqan kara meeshii la duray todobaad ilaa lix todobaad kadib. Taasi waxay qaadataa todobaadyo yar inay ku bogsato.
- Waxay meeshii la duray ku reebtaa nabad yar.
- Mararka qaarkood xanuunku wuxu siisocon karaa laba bilood. Taasina waa dhacdo caadi ah. Waxa wanaagsan in dhaymo qallalan lasaaro nabarka (faashad ku dhagaysa **maaha**).

7 Waxad u baahan tahay inaad la kulanto kallaalaha caafimaadka dadweynaha hadii:

- Caabuq ku soo baxo meeshii la duray.
- Xanuunku siyaado noqdo labada casho ee u horraysa durriinka kadib.
- Dhibka xanuunku siisocdo muddo labo bilood kadib ah.

8 Haddaad u baahato war intaa ka dheeraad ah fadlan la xiriir:

Magac _____ Derejo _____
Telefoon 262 1855

Waqtiga ugu wanaagsan _____